




REJO

waqti adag

JOYCE MEYER



REJO

WAQTI ADAG

JOYCE
MEYER



JOYCE MEYER
MINISTRIES

P.O. Box 5, Cape Town 8000

Unless otherwise indicated, all Scripture quotations are taken from
THE AMPLIFIED BIBLE: Old Testament.

Copyright © 1962, 1964 by Zondervan Publishing House
(used by permission); THE KING JAMES VERSION; and from
THE AMPLIFIED NEW TESTAMENT
Copyright © 1958 by the Lockman Foundation
(used by permission).

Copyright © 2014 by Joyce Meyer Ministries – South Africa

All rights reserved. No part of this publication may be reproduced, distributed, or transmitted in any form or by any means, or stored in a database or retrieval system, without the prior written permission of Joyce Meyer Ministries – South Africa.

Joyce Meyer Ministries – South Africa
PO Box 5, Cape Town, 8000

Phone: +27 (0) 21 701 1056
Website: www.joycemeyer.org

Go to tv.joycemeyer.org to watch Joyce's messages in a variety of languages

Hope For Difficult Times – Somali
Not For Resale

SHAXDA TUSMADA

<i>Hordhac</i>	5
1. Ka Buuxda Rejo Buuxda	9
2. Maxaa la Sameeyaa Marka aad Xayiranto	15
3. Doorro Dabeecad Rejo Buuxda	21
4. Ku Aamin Illaahey Duufaanta Dhexdeeda	27
5. Wax Kasta Waa Cusub Yihiin	33
6. Sedee Looga Kacaa Marka Aad Dareemeysid Hoos U Dhac	39
Gunaanadki: Miyaad Ku Jirtaa Waqti Adag?	47
Ducada Badbaadada	51
Qoraayga Ku Saabsan	52

HORDHAC

Waan ku farax sanahay in aad dooratay aqriska buugan.

Hadda la joogo, waxa laga yaabaa in aad si u damqaneysid ama aad dareemeysid in ey ku dabooleen waxa ku dhacaaya noloshaada, iyo inta aanan ogeyn xaaladdaada saxda ah, waan ogahay hal wax hubaal:

Kaligaa ma tihid - Illaahey waa ku jecelyahay, anaguna sida oo kale.

Xaqiiqdii, waxa aan u qoray buugan in aan ku dhiiri geliyo oo aan qalbigaaga ka buuxiyo rejo. Waxa aan rabaa in aad ogaato xataa haddeer, hadda la joogo inta u dhexeeya waxa aad ku dhex jirto, Illaahey waa kula jiraa wax aan ka suura gal aheyna ma jiraan asaga.

Waxa laga yaabaa in aad la macaamileysid musiibo aan loo jeedin, mana hubtid si aad u gurbiso jajabka (noloshaada aad dib isugu soo celisid) oo aad horey ugu socoto. Ama laga yaabee in aad xaalad caafimaad la silicsantahay mana heysatid hab aad ku aragto diktorka. Waan ogahay dad aad u badan in ey ku noolyihiin maalinba maalinta ka dambeysa, mana hubaan, halka quudkooda xiga ka imaan doono.

Marka aan ku dhex jirno walax aan adeygoodu suura gal aheyn, waxa na qabaneysa jooji oo ka quuso. Si kastaba aha ahaatee, waxa kaliya ee ugu sarreeya oo aan sameyn karno waa in aan Illaahey tala saarano oo aan ku sugnaano rejo buuxda. Laakiin waa maxay, rejada, runta ah?

Rejadu waa kalsooni laga filaayo wax wanaagsan in ey dhaci doonaan. Waxa ey si dhow xiriir ula leedahay iimaanka iyo waxa aan aaminsanahay. Haddii aan ku dhiirano in aan rejeyno, waxa ey nolosheena ku soo daadineysaa farxad iyo nabad.

Cadowgu waxa uu rabaa in aan rejo beelno. Waxa uu rabaa in aan ku qanacno in wax kasta dhumeen oo waxba eysan weligood sax noqon doonin. Laakiin illaahey waxa uu rabaa in ey rejo naga buuxdo - rumeysan oo filaaya waxa sarre. Wax yaalaha asaga ka yimaada, dhab aahaantii, Kitaabka Quduusku waxa uu leeyahay asagu waa "Illaaha rejada," ee naxariista badan iyo bilaabaha cusub (fiiri Rooma 15:13).

Sababta galmada, hadalka tuurista iyo xad gudubka caatifada waxa aan kula silcay aabahay caruurnimadii, waxa aan yeeshay aragti rejo la'aan ah. Wax yaaba badan oo xun ayaa igu dhacay oo aan bilaabay in aan filo waxa xun mar kasta, xata ka dib marki aan noqday Christian.

Si kastaba ha ahaatee, waxa aan si daacad ah u dhihi karaa illaahey waxa uu iga bedelay in aan ahaado qof xun oo rejo la'aan ah oo ii bedelay qof rejo ka buuxdo, mar kasta ka filaaya wanaagiisa gees kasta. Tartiib, tartiib ayuu ii caawiyay in aan ogaado awooda rejada iyo taasi maxa ey uga dhiggantahay fikirkeyga, erayada, dabeecadda iyo dhan kasta oo nolosheyda ah. Sidaas, xataa hadda marka aan la kulmo xaalad adag ama uu igu yimaado dib u dhac, rejada ayaan qabsadaa, aniga oo og in illaahey uu uga shaqeyn doono wax kasta wanaageyga!

Laga yaabee in aan u dulqaatay xanuun badan, niyad jab ama dib u dhac mana maleyn karo wax wanaag sanaay. Cadowgu waxa uu rabaa in uu kaa qanciyo in eysan waxba is bedeleyn. Laakiin illaahey waxa uu rabaa in aad ogaato in uu ku jecelyahay, waadna aamini kartaa asaga in uu mucjiso ka dhiggo qaskaaga! Qeybtaadu waa in aadan welgaa ka quusan - filashada wanaagiisu in uu soo muuqnaayo waqti kasta.

Bogaggan waxa ka mid ah casharada ugu sarreeya ee illaahey igu baray meeshan - casharada, kuwaas oo xoogeyn doona iimaankaaga oo kugu caawin doona in aad ugula dhawaato

nolosha oo dhan dabeecad cusub.

Sida badan waxa aan dhahaa qofka kaas oo ku sugnaada in rejo ka buuxdo - si joogta ahna u rumeeya erayga Illaahay oo diida in uu ka quusto - runtii marnaba lagama badin karro. Sababta oo ah xataa asga oo ku dhex jira duufanta noloshiisa, adiga oo saartay kalsoonidaada asaga, waxa uu ka buuxin karaa noloshaada nadda aan suura galka aheyn iyo farxadda iyo xaalad shaqo oo uu ka soo saaro wanaaggaaga.

Ma garanayo dhab ahaantii waxa aad soo martay noloshaada ama waxa laga yaabo in aad la kumeysid haddeertan. Laakiin waan ogahay in illahey kuu jecelyahay si aad u sarreysa, indhihiisa ayuu kugu hayaa, waa uuna ku caawin doonaa (fiir Rooma 8:38-39; Sabuuradii 33:18).

Waa Illaaha rejeyooyinka oo dhan, waanna midka kan u bedeli kara xattaa waqtigaaga aad u adag walax aad u sarreeya.

- CUTUBKA 1 -

Ka Buuxda Rejo Buuxda

Marmar waxa aan iraaahdaa waxa aan nahay jiilka “I tus”.

Waxa aan rabnaa in aan aragno walaxda ka hor inta aanan rumeynin. Dhab ahaantii, inteen badan wey nagu adagtahay in aan rumeysano in Illaahey inoo shaqeynaayo ilaa aan ku aragno waxa dhaca indheheena dabiiciga ah.

Laakiin saas ma ahan sida illaahey u shaqeeyo-waxa uu ka shaqeeyaa daaha gadaashiisa. Waxa laga yaabaa in aadan arag wax dhacaaya, Laakiin ma rumeysantahay in Illaahey ka shaqeynaayo wax yaabaha noloshaada haddertan? Ma rumeysantahay in uu u haayo qorshe uu ku caawiyo caruurtaada, guurkaaga, ama wax yaabaha aad u ducey saneysay sanado.

Yeremyaah 29:11 waxa uu yiri Illaahey waxa uu u haya qorshe wanaagsan noloshaada... *uu kugu rejo gelinaayo natiijadaada ugu dambeeysa*. Sida kale haddii loo dhiggo, illaahey waxa uu raadinayaa fursad uu kugu wanaajiyayo!

Laga yaabee in ey aad u adagtahay in aad qiyaasto naftaadu sida ey u toosantahay, qof iimaan-ka buuxo, rejo ka buuxdo. Haddii ey saas tahay, waan garnayaa dhabtii sida aad dareemeyso! Dadka qaar si fudud ayeey uga baqaan in ey rejo qabtaan maxaa yeelay waxa ey la kumeen niyad jab badan mana la aha in ey ka hor tiggii karaan xanuun kale.

Laakiin taasi waa caadi, maxaa yeelay illaahey waa “Illaahi rejada” oo naxariis badan iyo billaaw cusub (fiiri Rooma 15:13). Oo asaga la jir, marna aad ugama daahin bilaawga aaminaaddiisa, ka sii

hor dhac rejadiisa iyo filashadiisa.

FILASHADA WEYN...

Hal qeexid ee *rejadu waa* "La door bidi karo, kalsooni filasho."

Waxa aan rumeysanahay in aan marar badan qaadanay dabeecad toosan, oo aan go'aansaneyno kaliya "sug oo arag" haddii wax is bedelayaan ama "dhacayan" in ey si fiican noogu soconeyso. Laakiin illaaheey waxa uu nala rabaa in aan filano ujeedada. Waxa uu nala doonayaa in aan firfircooni u filano wax wanaagsan.

Marka, waxa aan ku weydiinayaa: ***Maxa aad fileysaa?***

Maxa aad ku aragtaa maskaxdaada iyo mala awaalkaaga? Sideed uga hadashaa mustaqbalkaaga? Marki aad kacdo aroortii, ma kula tahay, waa hagaag, ***Waxa ey ila tahay in aan gaari doonaa maalin kale.*** Mise la kacday filasho maantay waa malintii aan helaayay horuumarka guusha?

Wey ku habboon tahay marka marwadu uur leedahay, waxa aan dhahna wey "fileysaa." Wax badan oo ey sii ahaatana wax badan oo ey rejadeedu u sii badato waxa soo socda.

Uurkeygu waxa uu ahaay mid gaar ah maxaa yeelay waxa aan qaaday dhamaan afar caruur teyda ah ugu dhawaan bil ka badan waqtigoodi. Dictor keygu waxa uu igu dhahay waxa aad tahay marwada kaliya oo aan aqaan ee uur qaaday ilaa iyo inta maroodiga.

Ku sii jeedka dhamaadka uur kasta, waan kaca maalin kasta oo aan iraaqda, "manta waxa ey ahaaneysa maalintii - waa in ey ahaata maalinti!" waxa aan riseya boorsooyin keyga oo dhan oo aan diyaariya. Si joogta ah ayaan laba mar u hubiyay wax kasta aniga oo huba wax kasta in ey siman yihiin, kuna kalsoon in uu cunigeygu imaanaayo daqiiqad kasta. Waqti kasta oo

aan dareemo xanuun, waxa aan is iraaahdaa, *waa kaas! Waa soo socdaa!*

Sidani waa saxda Illaahey rabo in aad la ahaato Asaga! Waxa uu u haya qorshe cajiib ah naftaada, waxa uuna rabaa in aad sii odorosto in wax yaabaha wanaagsan ey agagaarka geeska midigtaada yihiin. Rejadu waxa ey leedahay: "Wax yaabuhu sidan ayeey ahaan jireen muddo dheer, laakiin Illaahey waa Illaaha aan macquulka aheyn, ee wax kasta bedeli kara."

MIYAAD TAHAY MAXBUUSKA REJADA?

Sidi aan sheegay, waxa aan ahaan jiray qofka ugu qaabka darasan oon ogahay. Waxa aan ahaay hubaal nuuca qof bakeeri bar dhimman - Hoos u dhac ayaan ku jiray xaalad kasta.

Taas ayaa cadeyneysa sababta aan aad ugu muruggeysnay. Shakiga iyo qaab darrida ayaa hoos noo dhiggeysa... laakiin rejadu waxa ey soo deysaa farxad!

Rejada macnaheedu waa qaab wanaagsan fadhiisin maskaxdaada ama dabecaddaada. Qofka rejada badan gebi ahaanba waxa uu iska diidaa in uu qaab darraado si kasta. In kasta oo ey aqoonsadaan oo ey la dhaqmaan duufaanada nolosha, waxa ey ku sii jiraan fikirka rejo badnida, dabecadda iyo wada sheekeysiga.

Haddaba marar badan, waxa ey ila tahay in nagula qabtay dabinta suggidda ilaa aan dareeno qaab wanaagsan ama rejo buuxda. Laakiin rejadu waa go'aan lagu ahaadu qaab wanaagsan oo aanan ugu noolaan sida aan dareemeyno. Runtu waa marka aan qaadano go'aan adag in aan u fikirno qaab wanaagsan, fikirka rejada buuxda leh, dareenku waa uu soo gaari doonaa ugu dambeynta!

Gebi ahaanba waan jecelahay Sakariya 9:12. Rabbigu waxa uu

yirri, *Soo celi dhufeyska adag [ee amniga iyo barwaaqada], adinku maxaabiista rejadow; xataa maantay waxa aan ku dhawaaqaya in aan idiin soo celin doono labanlaabka barwaaqadiini hore.*

Maxa laga wadda in aad noqoto "maxbuuska rejada"? waxa laga wadda anaga oo aan eegin waxa ku dhaca nolosheena, waxa aan diidnay in aan joojino rejada oo aan amino awoodda Ilaahey in ey imaaneyso.

Marka aad noqoto maxbuuska rejada, cadowgu ma garanaayo wax uu sameeyo. Waxa laga yaaba in uu kuula yimaado fikiradda qaabka darran, laakiin awood ma laha uu kugu wax yeeleeyo marka aad tiigsaneyso sii joogteynta saaro taladaada oo dhan Ilaahey.

Ilaahey waxa uu doonayaa in uu ku barakeyo oo uu ku siiyo labanlaabka xanuunkii aad soo dhaaftay iyo wax yaabihii kaa dhummay (fiiri Ishacyaah 61:7). Oo qeybteena ayaa sameysa kala duwnaashada oo dhan. Qeybteena waa in lagu **kalsoonado**, la amino oo la rejeyo.

WAA WAQTIGI BAROOSINKA LA SII DEYN LAHAAY

Cibraaniyada 6:19 waxa ey tirri, *[HADDA] waxa aan heysanaa [rejan] hubaasha ah iyo baroosinkan adag ee ruuxa [ma simbiriirxan karo mana jabi karto awood kasta oo u soo baxda]...*

Aan kala jebino qoraalkan. Hadda, Waxa ey ila tahay dhamaanteed waan naqaana waxa uu yahay baroosin. Marka aan rabno in ey doon joogsato hal goob, waxa aad hoos u sii deysa baroosinka, mana u ogol laaneyso in ey dhaqaaqdo si kastaba.

Waa hagaag, waxa ey yiraahdaan rejadu waa "baroosinka ruuxa." Ruuxeeenu maskaxdeena ayuu ku jiraa, rabiddeena iyo dareemadenuba. Ruuxeeena ayaa noo sheega waxa aan ku fikireyno, waxa aan rabno iyo waxa aan dareemeynaba.

Haddaba maxaa laga waddaa waxan oo dhan? Waxa laga wadaa marka wax kasta u ekaadaan in ey gurreen (rejo beelen)... Marka ey u muuqato sida waxba in eysan micno sameyneyn, oo aad dareemeysid sida balanta Illaahey eysan soo marreyn nolosheena, rejadu waa baroosin keena gadaal noo jiidaya oo dhaheysa "Waa ku salamay! Weli wey dhici doontaa!"

Laakiin dhacdadan aan sii qaadno xoogaa. Cibraaniyada 6:19 waxa ey leedahay rejadu waa baroosin keena ... *[ma simbiriraxan karto mana jebi karto qof kasta oo ku kor joogsada]*...

Rejadu waa baroosin keeni iyo wax kasta oo noo sababa "ka bixitaanka." Dadka qaar ulama kuman balamada iyo awooda Illaahey si fudud sababta oo ah kama baxan iimaanka. **Ka bixitankan ayaa ka dhigga balamada Illaahey fal ahaan!**

Aan ku siiyo tusaale. Mudo ka badan 40 sano, Ayaan ku safraayay aduunka oo aan baraayay aduunka illaahey. Laakiin weli waxa jira waqtiyo ka hor shirarka marka aanan dareemeyn caleema saarid, aan u qalamay ama diyaar aan u ahay in aan sameeyo waxa aan doonaayo in aan sameeyo.

Ka hor inta aanan masraxa soo fuulin, waxa aan is dhahaayay, waa hagaag, illaaheyow, waxa aan rejeynayaa in aad soo muuqaneyso ama aan ahay dhibaato badan. Ka dib marki aan ku dhaqaaqay in aan sameeyo waxa aan rumeysanahy in uu I weydiiyay in aan sameeyo, Illaahey had iyo jeer waa soo laadaa oo I caawiya in aan godbiyo fariinteyda. Marna ima uu ridin!

Qaar badan oo idinka mid ah, Illaahey waa idin suggayaa kaliya in aad u soo baxdaan baroosinka rejada. Waxa uu idinka suggayaa kaliya in aad qeytiina qabtaan si uu uga muuqdo noloshiina oo uu ugu sameeyo noloshiina wax la yaab leh.

Ha u ogolaanina in ey duruufaha noloshu kaa tuuraan wadada. Baroosin kaaga deyso oo banaanka ugu bax hubaasha aasaaska

rejada. Maxaa yeelay marka aad illaahey talo saarato, *laguma niyad jibin doono.*

- CUTUBKA 2 -

Maxaa la Sameeyaa Marka aad Xayiranto

Weligaa ma xayirantay? Weligaa ma ku dhacday nololshaada goob u eg sida dhamaadkii... sida adiga oo aan wax doorsho ah aan laheyn?

Marar badan ayaan halkaas joogay, waana hubaa dadka sida badan in ey joogeen. Laakiin waxa aan ku mahad dinayaa sanado badan In Illaahey I baray xattaa haddii aan xayiranno, ma jirto xaalad aad ugu adag asagu in uu qabto.

Aan bilaawno in aan fiirino sheekadii yuusuf ee buuga Bilaawgii (fiiri Bilaawgii 37-50). Kitaabka Quduusku waxa uu ahaay kan uu ugu jeclaay 12ka wiil ee abbihiis, walaalihiisna wey ka maseyr sanaayeen sabaabtaas aawageed.

Maalin ayaa yuusuf la wadaagay walaalihiis riyo uu lahaa. Riyadiisi, dhamaantood wey u sujuudeen. Uma baahna in laga sheekeeyo, in eysan samaan ku dhamaanin.

Sida natiijadi noqotay, walaalihi wey isu taggeen in ey go'aan sadaan sidii ey ugu dhameyn lahaayeen Yuusuf. Marki hore waxa ey ku tureen got oo ey uga taggeen halkaas in uu dhinto. Laakiin marki dambe waxa ey go'aansadeen in ey adoonimo uga iibiyaan kolonyo safar ah ganacsato reer Ismaaciil ah. Ka dib waxa ey hindiseen qorshe ey uga qanciyaan aabbahood dhimashadii Yuusuf.

Sida aad ogtahba, sheekadan waxa ey ku dhamaatay guul. Yuusuf waxa uu noqday ku xiggeenka Fircoon, ugu dambeyntii waxa uu

mideeyay qoykiisi, dhamaana waa leys cafiyay.

Waxa ku dhacay Yuusuf waa caddeyn in eysan muhiim aheyn waxa aad ku jirto nolosha, mar kasta waxa jira rejo. Waad xaqiijin kartaa ujeedada Illaahey kaa leeyahay maxaa yeelay wax kasta waa u suura gal Illaahey!

Laakiin qeyb ka mid ah sheeka diisa waxa aan runtii u baahannahay in aan diiradda saarno waa waxa ka dhacay inta u dhexeysa godkii iyo qasrigii. Noloshii Yuusuf isbedelo badan ayaa ku dhacay inta waqtigaas lagu guda jiray. Laakiin hal ka qeyb qaadasho ee dabeecaddisa ah ee soo gaarsiisay asaga dhamaadka guushan waa dul qaadka. Maxaa yeelay Yuusuf rumeysad kiisa uu u qabo Illaah, marna kama quusan.

KA QUUSASHADU DOORASHU MA AHAN

Nolosheena, waxa laga yaabaa in aan ku dhacno god marba xoogaa marki la joogo. Waxa aan ku jiri karaa godka jirada, lacag la'aanta, arimaha xiriirka ama mushaakillo. Mar kasta oo saas dhacdo, waxa aad u baahantahay in aad tiigsato si kasta oo xaalku ahaado, ma quusaneysid.

Mar kasta xasuuso, si aan marqaati wanaagsan uga ahaano wixi Illaahey noo sameeyay, waa in aan ka gudubnaa imtixaanada. Xattaa Ciise waa noo sheegay:

...Aduunkan waxa aad ka heleysan fitnooyin, jirabaad iyo ciriiri iyo niyad jab; laakiin niyad wanaagsanaada [dhiiranaada; isku kalsoonaada, hubaal shaki la'aan]! Waayo dunida waan adkaaday. [Waan u diiday awooda ey idinku wax yeeleyneyso oo waan idiin qabtay] (Yooxanaa 16:33).

Waa lama huraan in aad dhex martid wax yaabo adag. Mar mar waxaaba laga yaabaa in aad dareentid sida adiga oo quustay. Laakiin haddii aad celin laheyd kaliya oo aad illaahey ugu kalsoonan leheyd iyada oo dhan, waa kuu soo celin karaa. Waxa

uu kaa qaadan karaa waxa xun oo dhan oo kuugu bedeli karaa wax wanaagsan (fiiri Rooma 8:28).

Waxa la yiri Winston Churchill ayaa qudbadda soo socota ka jeediyay qalin jebintii Harrow School 1941:

"Marna, marna, marna, marna, marna ha ka quusan! Wax kasta ee weyn ama yar. Balaaran ama macna laheyn—marna ha quusan!"

Ma aqaan haddii ey taasi xaqiiqda kaliya tahay ee uu yiri, laakiin waxa aan rumeysanahay in Ruuxa Quduusku kala hadlaayo hal wax kuwa badan oo naga mid ah maantay—"ha quusan, waayo Illaahay waxa uu hayaa wax badan oo uu u soo celinaayo naftaada!"

Wey fududahay rabbidda quusashadu marki waxyaabuhu adkaadaan. Mar mar dadka wey ku stagtaa halka ey joogaan mana garnayan si ey uga baxaan, marka waxa ey la tahay quusashadu wey fududahay.

Waxa laga yaabaa in ey dareemaan in eysan xariif aheyn ama eysan karti ku filan laheyn; laga yaabee in ey wax naxdin leh ku dhaceen; ama laga yaabee in ey ku dhaceen wax ama ey sameeyeen qalad xun waqtigi la soo dhaafay.

Laakiin Ruuxa Quduusku Waxa uu na siiyay qowad iyo awood aan gudaha ugu riixno oo aan kor ugu riixo oo aan u gudubno guusha, xattaa haddii walaxdu eysan tegeyn waan qorsheynaa.

Dhicitanka macnahiisu ma ahan in eysan jirin doorashooyin kale. Waad ka baran kartaa qaladaadki hore—waxa aan arkay taariikh aan macalin fiican ku ahay! Marki wax kasta oo kale dhacaan, isku day mar kale. Haddii aan wax kale jirin, waxa aad baraneysaa waxa shaqeynaaya iyo waxa aan shaqeyneyn ee halkaas ka bilaaw. Waxa aad u bedeli kartaa caqabbaddaada fursad uu caqli gaagu ku koro iyo in aad ruux ahaan kortid.

Illahey waxa uu rabaa in aan nolol wanaagsan ku noolaano, si kastaba ha ahaatee ku kalsoonaaw oo dul qaadku waa muhiim. Ruuxa Quduuska ah ayaa nagu haggaya hal tilaabo oo iimaanka ah markiiba qorshaha wanaagsan ee illahey no ohayo midkeen kasta oo naga mid ah. Qeybteenu waa in qaadno tilaabooyinkaas... oo aanan quusan.

MAXAA LA SAMEEYAA MARKA AAD DAMQANEYSID

Arragtidaadu inta aad "god" kaaga ku jirto waxa ey sameyn kartaa is bedel weyn sida oo kale.

Xasuuso, waa waqtigi tijaabada... waqtigi marki dabeecaddaadu hormareysay. Waqtigan waa waxa aan marmar ugu yeero "sanaddihii aamusnaanta" maxaa yeelay waa waqtigi marka aad dareemeysid sida in wax badan oo nololshaada ka socdaa eysan jirrin.

Ama waxa aad ku dhex jirtaa xanuun badan iyo kacdoon, oo waxa aad dareemeysaa in uusan Illahey waxba ka qabaneyn. Laakiin waa aasaas muhiim ah in aad ku kalsoonaato asaga inta waqtigan lagu jirro, maxaa yeelay waxa uu ka shaqeynayaa qalbigaaga in uu ka dhiggo sida Masiixi.

Haddaba maxaad sameyneysaa marka aad godka ku dhex staagto?

- *Ha quusan!* La dagaal jarribaadda aad is dheheyso jid kale ma jirro looga baxo xaaladdan. Ciise ayaa jid ah. Hadda waa waqtigaagi aad u soo dhawaan laheyd oo aad raaci laheyd asaga.
- *Iska ilaali in aad Illahey eedeeyso ama aad is tiraahdo waxa uu ii ciqaabaya xoogaa dambi ah.* Waxa kaliya oo uu isticmaalayo xaaladda waa si uu uga shaqeeyo nololshaada. Oo inta laga yaabo in uusan dareenku wanaagsaneyn, ujeedadiisu mar kasta waa wanaagaaga.

- *Sameey waxa saxda ah xataa haddii aad damqaneysid, marka dareenku uusan saxneyn ama kuwa kale kuula dhaqmaan xumaan.* U sameey wax wanaagsan inta dad baddan oo aad awooddo inta baddan oo aad awooddo.
- *Dib ha u guranin oo carro ha la aamusin ama ha ka go'odoomin naftaada kuwa kale.* Xasuuso, waad naxariis badnaan kartaa ama awood badnaan kartaa, laakiin labada iskuma yeelan kartid! Marar badan, Illaahey waa kuu isticmaali karaa waqtigaas kuwa kale in aad dhiiri geliso.
- *Ka dhig eraygaaga iyo sharaftaada in aad ku adkeysato.* Hadda waa waqtigi dhismaha dabeecadda, waadna u diyaar garowday in aad ka qaadato booskaaga qasriga.
- *Ha joojin in aad aaminto...* ha ka quusan in Illaahey hagaajin karo xaaladdaada!

ISKA RUX

Waad maqashay sheekada ku saabsan dameerka ku dhacay godka. Arragtida wixi dhacay kii iska lehay xoogaa ayuu fikiray, ka dib ayuu is yiri godku aad ayuu u dheer yahay dameerkuna aad ayuu duq u ahay, markaas ayuu go'aansaday in uu ceelka ku duugo.

Waxa uu wacay qaar ka mid ah saaxibbadiis iyo deris kiisi in ey caawiyaan, waxa ey bilaabeen in ey ku badeeleeayan wasakh ceelka.

Marki koowaad dameerki kor ayuu u ooyay, wey muuqataa waa uu ka argagaxay xaaladdiisa. Marki dambe si kastaba ha ahaatee, kan iska leh waxa uu ogaaday in uu aamusay oo waxa uu is yiri malaha mar hore ayuu dhintay. Laakiin dameeku ma dhiman.

Marki kii iska lahaay hoos u fiiriyay godki, waxa uu arkay mar kasta oo wasakhdu dhabarkiisa ku dhacdo, dameerku waa iska ruxaa oo ku istaagaa, asaga oo ku riseynaaya qoobabkiisa hoostooda.

Tani waxa ey socotay saacado ilaa uu, ugu dambeystii, uu dameerkii riseeyay wasakh ku filan in uu kor u soo kaco oo uu ka soo baxo godka.

Wax ayaan ka baran karnaa dameerkaas. Noloshu waxa ey nagu soo tuureysaa wasakh waqti ka waqti. Waxa laga yaabaa in tahay xiriir ama dhaqaale ama caafimaad. Kanu waa waqtigi barashada sida loo raaco Ruuxa Quduuska. Waxa uu ku tusi doona sida leysaga ruxo wasakhda oo loogu istaago, waxa uu ku siinayaa bidhaan amaantiisa tilaabo kasta oo aad ka soo qaado godkaaga oo aad ku socoto qasriga.

Waxa jiri doona mar kasta caqab laga adkaado. Waxa jiri doona mar kasta "arrimo" laga gudbo. Laakiin waxa jiri doona sida oo kale in ey aahaado xad-dhaaf, fursad labaad iyo bilaaw cusub.

Marna ma daahin—kaliya ha quusan! Inta aad sameyneyso qeybtaada oo aad sameyneyso waxa aad awoodo—inta aad ku adkeysaneyso rejada, horay u soco, iska diid in aad ka quusato Illaahey—waxa uu ku ahaan doonaa aamin in uu sameeyo waxa aad awoodi weysay.

Waa hagaag, haddii ey kugu istaagto oo aad garan weyso si aad u sameyso, ha Ka quusan rejada, maxaa yeelay waxa aad joogtaa meel saxan ee aad cuseyb uga bilaawdo.

Dooro Dabeecad Rejo Buuxda

Maxaa yeelay waa leygu xad gudbay gabarnimadeydi, waxa aan baratay cabsi aan caadi aheyn in ey wax xun mar kasta dhici doonaan. Waxa laga yaabaa in aad la xiriirto waxa aan sheeggaayo.

Waxa yaabo baddan oo xun ayaa igu dhacay ilaa aan soo gaaray halka aan filayo wax xun mar kasta, xataa ka dib marki aan Masiixi noqday.

Waxa aan xasuustaa subaxdi aan ugu dambeysti duceystay oo aan wediiyay Illaahey, "Waa maxay waxani? Maxaa aan u dareemayaa sidan mar kasta?"

Illaahey qalbigeyga ayuu la hadlay oo yiri, "**waa cabsi sheydan.**" Weligeey eraygaas horay uma maqal, laakiin dhowr maalmood ka dib waxa aan arkay maahmaahyadii 15:15, taas dhaheysa:

Maalmaha oo dhan ee niyad jabka iyo dhibaatooyinka waxa sameeyay sheydaanka [waxa keena fikirada welwelka iyo cabsida], laakiin kii kan leh qalbi faraxsan waxa uu leeyahay iid joogta ah [xaalad kasta ha ahaatee].

Dhamaanteen waxa aan ku teggi doonaa waqti adag nolosheena, oo marka ey nagu dhacdo, wey fududahay in laga cabsado mustaqbalka oo uu nagu dhaco fikir welwel ah iyo **cabsiyo**. Laakiin waxa aan u baahanahay in aan gaarno heerka halka aan baraneyno in aan ku raacno illaahey iyo eraygiisa marki dhibtu timaado.

Waxa aan sii deyn karnaa iimankeena anga oo dhaheynta, "waan ogahay in Illaah I jecelyahay. Asagu waa I daryeeli doonaa oo I difaaci doonaa. Waan aaminsanahay in uu I siin doono nimacada

iyo xooga aan ku sameeyo waxa aan u baahanahay in aan sameeyo, oo wax wanaagsan ayaa ka soo bixi doona tan.

HA KHALKHALIN!

Illaahay marnaba nooma damacsana in aan murugoono ama ey noo timaado “maalin naxdin,” leh xataa marka eysan walaxdu u socon jidkeena. Waxa uu rabaa in aan filano wax yaabo wanaagsan. Oo aan ku joogno rejo buuxda, iyada oo aan loo eeggin duurafaheena.

Halkanna waxa aha laba eray oo kaa caawin doona in aad sameyso: *Ha cabsan*.

Waa maxay cabsi? Cabsidu waa si fudud oo filasho ah in ey kugu dhacayaan waayo aragnimo aan fiicneyn—waa saxda ka soo horjeeda rejada.

Ayaga oo xataa aanan garowsan, waxa aan is leeyahay dad badan ayaa ka cabsada jidkooda maalinta oo dhan. Waan ka cabsan karnaa aadista shaqada, ka cabsan karnaa ciriiriga wadooyinka, ka cabsan karnaa dhaqista suxuunta, dhaqista dharka, gurista cowska, karinta cashada, iwm iwm.

Si kastaba ha ahaatee, cabsidu waxa ey naga xadi kartaa farxaddeena oo naga haleyn kartaa maalin teena. Cabsidu waxa ey nooga teggi kartaa rejo la’aan. Bedelkeedi, waxa aan kugu dhiiri gelinayaa in aad joojiso in aad ka murogooto waxyaabaha aadan waxba ka qaban Karin. Dooro in aad farax sanaato una dey Illaahay ha daryeelee.

Xaalad kasta, waxa aan u baahanahay in aan lahaano dabeecad dhaheysa, “waan sameyn karaa wax kasta oo aan u baahanay in aan sameeyo, mana joojinaayo in aan ku raaxeysto nolosheyda, iyada oo aan loo eegin waxa dhacaaya. Ma qorsheynin waxan, laakiin waan ogahay Illaahay waa uga shaqeyn karaa wax kasta wanaageyga.”

Haddeer, ma dhahaayo in ey ka dhiggeyso in mushkiladdaadu teggi doonto mar kasta. Si kastaba ha ahaatee, doorashada in aadan cabsan hubaal waxa ey ka dhiggi doonta nolosha mid ka sii wanaasan!

FARAXAD KA HELID WAX YAABO YAR YAR

In aad hesho nolol guul ah ma ahan kaliya wax ku saabsan “weyni” wax yaabaha nolshu—waxa ey ka bilowdan wax yaaabo yaryar. Rabbigu waxa uu rabaa in aan awoodno in aan ku lahaano guul iyo farxad dhan kasta ee nolosheena ah, oo aan ka adkaano cabsida waa qeybata ugu weyn. Doorashdeena in aan lahaano samaan, asluub rejo buuxda waxa ey macna ahaan ka bedeli kartaa wax badan!

Hubaal, waxa jiri doona wax yaabo nolosha aad ugu adag ama raaxo yar; si kastaba ha ahaatee, ma ahan in ey na murugeeyaan ama haleeyaan maalinteen. Doorashada anaga yaa iska leh iyo asluubta aan doorano.

Yaab ayeey leedahay inta aan dareemi karno ka xumaanta nafteena oo aan u ogolaano in asluubteenu haleyso maalin aad noogu wanaagsan nolosheena iyo kuwa kale. I aamin, waan ogahay—aad ayaan u wanaagsanaay in aan ka ciyaaro “shahiid” marka ey timaado qabashada shaqad guriga.

Sida badan guriga ayaan dhex socsocdaa neef tuurid, sida aan wax yaabaha la murmaayo, “waa hagaag, qof kasta oo halkan ka dhow waxa uu iga filayaa in aan wax qabto. Daa’uud banaanka ayuu u baxaa oo ciyaaraa golf caruurtuna waxbey qasan. Cunta dooda kaliya ayaan kariyaa suxuun toodana waan dhaqaa dhar koodana waan dhaqaa. Waxa aan rabaa in aan ogaado yaa I daneynaaya!”

Runtu waxa ey ahayd qofna ima qasbeyn in aan sameeyo waxaas. Aniga ayaa doortay in aan sameeyo ayaga maxaa yeelay waan jecelahay qoyskeyga. Si kastaba ha ahaatee, in yar ayaan

raaxeystaa nafteyda maxaa yeelay waxa aan tiigsaday in aan yeesho asluub xun.

Waxa ey u muuqataa in aad taqaaniin? Waxa laga yaabaa in eysan asluub tiinu aheyn waxa ku saabsan shaqo guri, laakiin waxa aan dhamaan teen isku deynaa in aan dareeno ka xumaashada nafteena oo aan ka cabsano walax mar ama marar.

Xataa marka xumaan ama waxa aan lagu qanci Karin nagu dhacaan, weli waan dooran karnaa in aan uga jawaabno si samaan ah. Marki aan sameyno, waxa aan ku raaceynaa Illaahey maxaa yeelay Illaahey mar kasta waa san yahay.

DIIRADDA SAAR SAMAANTA

Sida badan dadka waxa aan ku dhiiri geliyaa ciyaar "Ciyaarta Farxadda." Waa maxay? Marka aad ku tagto xaalad xun, dooro ujeedo aad ku fiiriso awooda wanaagsan!

Tusaale, haddii traafic ku istaajiyo, dheh, "tartiib ayaan u soconoyaa gadaalna waan u ordayaa, laakiin laga yaabee in illaahey iga celinaayo eksidentigu dhici lahaay haddii aan xoog u ordi lahaay."

Saanu wey shaqeyneysaa xaalad kasta, yar iyo weyn. Xataa haddii ey tahay walax muhiim ah sida shaqo aad weyneyso, waxa aad dooran kartaa in aad diiraddaada u bedesho samaan oo aad dhahdo, "waxa laga yaabaa in aan shaqo waayo, **laakiin haddeer waxa aan heystaa fursad aan ku daawado shaqo ka wanaagsan tii aan heysatay ee Illaahey ii siiyay.**"

Kitaabka Quduusku waxa uu leeyahay...Rabbigu [si dhab ah] suggaaya [filaaya, fiirinaaya, oo hiloobay] in uu ku nimceeyo... si uu naxariisto oo uu kuugu muujiyo jaceylka naxariista... (Ishacyaah 30:18)

Muhiim ma han waxa noloshu kuu keento, illaahey waxa uu

haya qorshe uu uga wanaagsan—qorshe ey ka buuxdo rejo iyo wax wanaagsan. Waxa aan kugu dhiiri gelinayaa in aad ka hesho ku raacis asaga.

Ugu dhawaaw maalin kasta samaan. Asluub rejo badan oo dooro in aadan cabsan. Inta aad sameyneyso, waxa aan aamin sanahay in aad bilaabi doonto in aad ka hesho farxad qeyb kasta oo ka mid ah noloshaada.

Ku Aamin Illaahey Duufaanta Dhexdeeda

Sanado badan, **waxa aan bartay in ey taahay hal wax in loogu kalsoonaado Illah –in aad beddesho wax ama qof noloshaada–laakiin waa wax kale gebi ahaanba in aad Illaah ugu kalsoonaato wax.**

Waxa baddan oo nasasha ah ayaan qaataa Ishacyaah 43:2-3. Waxa uu leedahay, *Marka aad ka dhex gudubeyso biyaha, waan kula jiri doonaa, oo dhex marka wabiyaashu, kuma liqi doonaan. Marka aad dhex socoto dabka, ma guban doontid mana gamaari doontid, holacuna kuma olcin doono. Waayo anigu waxa aan ahay Rabbiga Illaahaaga....*

Marka aad dhex mareyso waqti adag, aad ayey muhiim u tahay in aad xasuusato in illaahey halkaas kula joogo, waadna ku kalsoonaan kartaa Asaga in uu kaa caawiyso dhex markeeda.

Tusaale ahaan, wey adkaan kartaa in lagu sii jiro iimaanka marki xaaladdu eysan sameyneyn wax macna ah ama noloshu eysan cadaalad u egkeyn. Gaar ahaan wey adagtahay marka aad dareemeyso in aad sameyneyso wax eysan aheyn in aad sameyso mana heleysid natiijo sax ah.

Ama tan kawaran: Wax aad aragtaa qof aan sameyneyn wax sax ah, weli waxa uu u muuqadaa in uu helaayo natiija ka wanaagsan taada! Waxa jiri doona waqti nolosheena marka wax kasta dareenkoodu u egyahay in uu ruxmaayo oo aan waxba dareenkoodu hubaal aheyn, jawaabta kaliyana waa kalsoonida Illaahey kuna sii kalsoonaaw Asaga.

Waxa kale oo aan ka bartay waayo aragnimada in Illahey u isticmaali doono waqtiyadan faa'iidadeena. Marka noloshu degganaan la'aan tahay, Asagu waa isticmaali doonaa xaaladdan in ey naga caawiso koritaan aan ugu dhawaano Asaga oo si adag ugu dhegno dhagaxa badbaadada—Ciise Masiixa—kaas oo aan la dhaqaajin karin lana ruxi karin! (Fiiri Sabuur 62:2, 6).

KU "KORITAANKA" WAQTIGA ADAG

Tani waxa ey u egkaan kartaa wax lagu qoslo, laakin waxa aan ku imid ilaa halka aan rumeystay tijaabooyinka iyo addeygu in ey noqon karaan qaarka saaxib badeena ugu wanaagsan. Sabab? Maxaa yeelay Rabbiga ayaa isticmaala ayaga in uu wax nagu barro, nagu tababarro, oo nagu caawiyo koritaan keena siyaabo aanan anagu yeelan Karin.

Xaqiiqdi, Yacquub 1:2-3 waxa uu noo sheegaya, tixgeliya farxadda oo dhan, walaala heyow, mar kasta oo lagugu xiro gudaheeda ama aad ku timaado tijaabo nuuc kasta ama aad ku dhacdo jirraabadyo. Hubsanaaw oo faham in tijaabada iyo caddeynta iimaankaaga ey soo saarayan dulqaad isku duubnaan iyo sabar.

Tijaabada iyo silicu kama yimaadan Illahey, laakiin waxa uu u isticmaala ayaga in uu xoog noogu yeelo oo nagu caawiyo farxada nabad buuxda, deganaan iyo gaarista nolosha.

Waqtiga adag ee nolosha waxa uu noo sababaa in aan ku hormarno qofka aan rabno in aan noqono. Marka aan ku tagno xaalad "maskax deena ka weyn," waxa ey naga caawisaa in aan u dhiibno ku tiirsanan teena Asaga, ogaalna u leh in aanan xali Karin dhamaan dhibaatiyinkeena.

Rabbigu waxa uu rabaa in aan ugu nimaano awooddeena oo aan gaarno heerka aan ku sugnaan karno xasilooni xataa haddaan ku tagno tijaabada nolosha. Waxa uu rabaa in aan farxad lahaano oo aan ku qanacsanaano asaga, xataa marka xaaladdaheenu

eysan sax aheyn (fiiri Nexemyaah 8:10).

Sida diimandigu uu ugu sameysmo cadaadis sarre hoostiis, illaahey sida badan waxa uu u isticmaalaa adeyga nolosheena in aan is hooseysiino, hor marino dabeecaddeena, ee noo bedeleysa muuqaalkiisa... oo noo diyaarineysa waxyaabaha wanaagsan ee Asagu no ohayo mastaqbalka.

TIJAABADU WAXA EY NAGA CAAWISAA KU KALSOONIDA

Waxa ey leedahay xoriyad weyn kalsoonida illaahey. Marki walaxdu eysan dhankeena u socon, halki aad ka caroon laheyd am ka xumaan laheyd, waan ku kalsoonaan karnaa in uu haayo qorshe ka wanaagsan keena, ugu dambeyntiina waxa uu uga shaqeyn doonaa xaaladda sida noogu wanaagsan (fiiri Rooma 8:28).

Waxa aan u baahanahay in aan fahamno tan maxaa yeelay marmar marka dhib na hayo, waxa aan ka xomaan karnaa Illaahey ama xataa dad kale kuwaas oo la barakeeyay. Waxa aan yeelan karnaa dabeecadda is xaq siinta taas oo dhaheysa, "Waa hagaag, wax aan ahay masiixi kaa wanaagsan. Waan astaahilaa barakooyin kaas."

Tusaale ahaan, laga yaabee in aad rabto in lagu dalac siiyo shaqada, laakiin wax kale ayaad heshay bedelkeedi. *Maxaad sameyneysaa?*

Waad ka xumaan kartaa, is xaq siinta oo runtii is dhaawici kartaa naftaada ruuxaanidan. Ma Illaahey ayaad ku kalsoonaan kartaa oo aad dhaheysaa, "Rabbiyow, haddii tani tahay meesha aad ila rabto haddeer, haddaba waxa aan ugu adeegayaa madaxeyga ilka cadeyn wajigeysa. Waana ogahay haddii aad ila rabto in aad l geyso meel kale, waad ku sameyn kartaa waqtigaaga saxda ah."

Waxa aan bartay in illaahey naga xariifsan yahay! Marmar waa uu joojiyaa in uu nasiyo waxa aan rabno maxaa yeelay waxa uu

maskaxda ku hayaa ujeedo kale–marmar ka fiican waxa aan u maleyneynay.

Tusaale ahaan, marar badan Rabbigu waxa uu ii ogolaaday in aan wax yaabaha u dhex maro si adag. Marmar aad ayeey u adkeyd, gaar ahaan marki aan daawady dad kale ee helay ka gudbid isla meesha si degdega.

Laakiin marki Illaahey ii ogolaaday in aan ku socdo wadadan, Waxa uu rabaa in aan waayo arag ku noqdo oo aan fahmo waxa dadku ku dhex jiraan si aan ula xiriirin karo xanuun kooda oo aan u caawiyo si ey guul ugu dhex amraan.

